



Waa maxay dambi naceybka?

Sida laga soo xigtay Hay'adad Dambi Baarista (Federal Bureau of Investigation – FBI) dambiga naceybka ee federaalka ah (loona yaqaan dambiga eexda) waa “dambi laga galay qof ama hanti loona aaneyn karo dambiille kaaga eexanayo jinsiyada, diinta, naafanimo, qowmiyad, sinjiga, ama sinjiga qofka isku tiriyo.” Gobolada way ku kala duwan yihiin kooxaha lagu difaaco sharciyadaan dambiga naceybka ah, dambiyada ku kooban sharcigan iyo ciqaabta dambiilayaasha.

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeega Xiriirka Bulshada (CRS)

Caawinta Bulshada

Kahortagga iyo ka Jawaabidda Dambiyada Naceybka

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeega Xiriirka Bulshada (CRS) waa “Nabadoonka Mareykanka” ayadoo fududeynaysa fahanka iyo wanaajinta xiriirka dadka soo foodsaartay iskudhac, iyo awooda bulshada si gooni ah uga hortagto oona xaliso iskudhaca mustaqbalka.

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” u ah bulshada soo wajahday xiisado ama iskudhac ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. CRS malaha awood nabad sugid ama maxkamadeyn ah. Laakiin, CRS waxay la shaqeysaa bulshooyinka iskudhaca ka jira si ay u dhisto xiriir, fududeyso Isfahan, una dhiirri geliso horumarinta xal u helida degaannka.

Shaqaalaha CRS waxay si toos ah ula shaqeeyaan saraakiisha gobolka iyo degaannka, ururrada bulshada, bulshada iyo xuquuqda rayidka kuwa u dooda, kooxa-diineedka, iyo nabad sugidda si tabarruc ah oo lacag la'aan ah. CRS waxay u shaqeysaa si dhexdhexaad ah, adeegyadeedana waa xafidanyihiin.

Sidee ayay CRS bulshada uga caawisaa ka hortagida iyo ka jawaabida dambiyada naceybka?

CRS waxay isku keentaa hormuud kala duwan iyo kuwa daneeya arrimahan si bulshada wax looga baro dambiyada naceybka iyo si loo helo xal looga hortago loogana jawaabo dambiga naceybka.

Adeegyada qaaska ah ee CRS ee caawiyo in bulshada wax ka qabtaan dambiyada naceybka waxaa kamid ah ▼

Fududenya Wada hadalka

CRS waxay fududeysaa kulamada u dhaxeeya hormuudka bulshada, saraakiisha dowladda hoose, nabad sugidda iyo kuwa kaloo muhiim ah si loo furo wadahadal loona dhiirri geliyo xalinta dhibaataada dambiyada naceybka iyo eexda. Mowduucyada badanaa laga hadlo waxaa kamid ah dambiyada naceybka, eexda ama dhacdooyinka, siyaabaha nabad sugidda uga jawaabto dambiyada naceybka, eexda ama dhacdooyinka, faahfaahinta sharciyada degaannka ee dambiyada naceybka, dibadbaxa, banaambaxa iyo ka jawaabka bulshada iyo arrimo kale ee muhiim u ah bulshada.

Madasha Dambiga Naceybka

Madashan maalin barkeeda soconaysa waxay siisa xubnaha bulshada iyo nabad sugidda macluumaad la xiriira sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., iyo sharciyada dambiyada naceybka ee gobolka iyo degaannka. Barnaamijka waxuu la howlgalaa nabad sugidda degaannka, garyaqaannada degaannka, nabad sugidda federaalka, iyo ururrada bulshada u dooda si looga hadlo loona wadaago macuulmaad ah sida loola dagaalo loogana jawaabo dhacdooyinka dambiyada naceybka iyo eexda.

Madasha Difaacidda Meelaha Macbadka ah

Madashan maalin barkeedka ah waxay siisaa hormuudka arrimaha diiniga iyo jameecooyinka macluumaad ku saabsan dambiyada naceybka diimaha, qiimeynta khatarta ee degaanka, gobolka iyo nabad sugidda federaalka ay sameeyaan iyo tallaabooyinka looga difaaco inuu dhaco falalka dambiyada naceybka. Barnaamijka waxuu dhiirri geliyaa in la howlgeliyo barnaajim amniga ah, sida ugu wanaagsan ee amniga loo dhowro, kobcinta isku xirka bulshada, uuna bixiyaa macluumaad sida tusaalayaal qorshaha amniga ah iyo sida bulshada jawaab uga bixiso.

Barnaamijka Ogaashada Dhibaataada iyo Isla Xalinteeda ee Magaalada ama Iskoolka ee loo soo gaabiyo (City-SPIRIT iyo School SPIRIT.)

Barnaamijkan sideeda saac soconayo ee dhibaato-xalinta ah waxuu isku keenaa wakiillo ka socda dowladda deaanka, iskoollada, bulshada, ururrada diiniga, nabad sugidda, iyo kuwa kale si loo ogaado loona falanqeeyo arrimaha waxyeelleynayo bulshada, loo fududeeyo wada shaqeynta lagu xaliyo iskudhaca, iyo loo fududeeyo horumarinta falal muuqdo ee u dhaxeeya dhinacyada.

Tababarka Wacyigelinta Bulshada

CRS waxay tababarro siisaa nabad sugidda, saraakiisha dowladda, iyo kuwa kale oo ah caadooyinka, iyo dhaqamaha bulshooyinka kala duwan iyo bulshadaas ay u adegaann. Tababarradan waxaa kamid ah la Xiriirka iyo Dhisidda Iskaashiga Muslimka Mareykanka, la Xiriirka iyo Dhisidda Iskaashiga Siingaha Mareykanka, iyo Tababarka Nabad Sugidda ee Dadka Sinjiga Badesho. Tababarkan is dhexgalka iyo warbixinta leh waxaa kamid ah mowduucyada sida astaamaha dhaqanka iyo luqada, saameynta dambiyada naceybka, iyo siyaabaha ugu fiican ee looga wada shaqeeya xalinta arrimaha. Ugudambeyn, tababarradan waxay ka caawiyaan nabad sugidda dowladda ay ku difaacaan uguna adegaann dhamaan xubnaha bulshooyinka.

Dhexdhexaadin

CRS waxay bixisaa adeegyada dhexdhexaadinta si ay uga caawiso bulshooyinka inay xaliyaan iskudhaca iyo xiisada si fool ka fool ah uga doodaan dadka ay quseyso. Ujeedada dhexdhexaadinta waa in lagu sameeyo heshiis qoraal ah ee dhinayada u dhaxeeyo taasoo kordhiso is aaminka, kordhiso iskaashiga bulshada, iyo dhisto waxqabad degaanka ah si looga hortago loogana jawaabo iskudhac mustaqbalka ah.

Xagee ka Shaqeynaa ▼

Xarunta CRS 📍
Washington, DC

Xafiisyada Gobolada CRS 📍

New England

Boston, MA

Waqooyi-bari

New York, NY

Atlantiga-Dhexe

Philadelphia, PA

Konfur-bari

Atlanta, GA

Galbeedka-dhexe

Chicago, IL

Konfur-galbeed

Dallas, TX

Dhexda

Kansas City, MO

Buuraleyda

Denver, CO

Galbeedka

Los Angeles, CA

Waqooyi-galbeed

Seattle, WA

Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada


 📍

Miami, FL

Detroit, MI

Houston, TX

San Francisco, CA




Naga hel, nagala xiriir ▼

www.justice.gov/crs

 facebook.com/DOJCRS/

 @DOJ_CRIS

 askcrs@usdoj.gov

 202.305.2935